

- Turjumidda kahor waa in turjubaanka u labada dhinac wargeliya doorkiisa, waajibka xajinta sirta xirfadda iyo in u turjim doonoo wax kasta oo dhinacyada is-yiraahdaan. Dhinacyada waa in ay ka fiirsadaan ereygii aysan doonayn in la turjummo.
- Turjubaanka waxaa saaran waajibka xajinta sirta xirfadda, taasoo ku xusan Xeerka xajinta sirta xirfadda. Taasoo macneheeda ah in turjubaanka aan loo oggolayn in marna u ka hadlo wixii dhegahiisa ku soo dhacay turjumidda kahor, xilligii turjumidda iyo turjumidda kaddib.
- Turjubaanka waa qof dhexdhexaad ah oo aan dhinac la jirin.
- Turjubaanka waa in uu hadla qaab shaqsiyeed sida (aniga waxaan) mana loo oggola in u wax ku daro, ka beddelo ama usan turjumin wixii la yiri.
- Turjubaanka wuxuu xaq ku leeyahay in u hakad geliyo hadalka dhinacyada, waa haddii usan turjumi karin weeraha dhaadheer.
- Turjubaanka looma oggola in u qabto hawl aan ahayn turjumidda.
- Turjubaanka wuxuu mas'uul ka yahay luqadda – adeegsadeha turjubaanka wuxuu mas'uul ka yahay waxa la turjumaayo.
- Turjubaanka iyo adeegsadeha turjubaanka waa in ay tixgeliyaan nidamka xiriirkka leh xaaladda danaha ay iska soo horjeedaan. Turjubaanka waxaa waajib ku ah in usan aqbalin turjumidda haddii u aqoon gaar u leeyahay qof dhinacyada kamid ah – waa haddii saamayn micno leh ay turjumidda ku yeelan karto.